

Hagidda Caafimaadka Guriga/Daryeelka Guriga ee COVID-19



Hagiddan soo socota waa higid loogu talagalay in ay adeegsadaan shaqaalaha bixiya daryeelka guriga, caafimaadka guriga, iyo hay'adaha maamula guryaha bukaannada lagu xannaaneeyo marka ay guriga ku caawinayaan macaamiisha ama bukaannada, ka caawinayaan daryeelka shakhsiyeed, ama bixinayaan daryeelka caafimaadka guriga gudahiisa lagu bixinayo.

Bukaannadaada waxay halis weyn ugu jiraan jiro ba'an.

Dadka ay da'doodu ka weyn tahay 65 sano ama dadka da' kasta jira ee qaba xaalado caafimaad ayaa waxay halis weyn ugu jiraan jiro ba'an in ay ka qaadaan cudurka COVID-19.



Haddii aad halis weyn ugu jirto...

Haddii aad ka weyn tahay da'da 65 sano jir, oo aad leedahay xaalado caafimaad, ama aad uur leedahay, qaado waqtiga fasaxa ee bukaanka la siiyo ama weyddiiso in aad la shaqeyso macaamiisha aan la xannuunsan-ayn cudurka COVID-19.



Shaqo ha aaddin haddii aad xannuunsan tahay.



Shaqada ka hor

Horey u qorsheyso



- Qorshee daryeelka dadka loo marsiiyo telefoonka ama fiidiyowga lagu wada sheekaysto.
- Isu-diyaari waqtiyada aad sida tooska ah ula xiriiri doonto bukaankaaga.
- U-jadwalee booqashooyinka guriga ee dadka qaba ama laga yaabo in ay qabaan cudurka COVID-19 maalinta dhammaadkeeda.



Sahami ikhtiyaarrada daryeelka meel fog laga bixiyo



- Telehealth
- Fiidiyowga lagu wada sheekaysto

Xusuusi xubnaha reerka in ay ilaaliyaan naftooda iyo kuwa kaleba iyagga oo:



Xaddidaya booqashooyin ay dadka kale ugu yimaadaan iyo iyagga aan u oggolaanayn shaqaalaha ama xubnaha qoyska ee buka in ay waqtigan soo booqdaan.



Xiro weji xir maro ka sameysan marka aad dibedda u soo baxdo oo aad bulshada ku dhex jirto.

Xubnaha reerka u sheeg sida ay uga hortagi karaan in ay qaadaan oo ay faafiyaan cudurka COVID-19.

Marka aad shaqada joogto

Ilaali naftaada iyo dad kale



Gacmahaaga ku dhaq inta badan saabuun iyo biyo ama adeegso gacmo nadiifiye ay ugu yaraan ku jirto aalkolo 60% ah.



Dabool qufaca iyo hindhisada.



Xiro af-xirka qalliinka

Dooro af-xirka qalliinka, ee ha dooran weji xirka marada laga sameeyay, si aad u hesho difaac kugu filan.

Nadiifi oo jeermiska-ka-dil sagxadaha



Meelaha ay taabashadoodu badan tahay ku nadiifi tirtire jeermis-dile ah ama waxyaabaha kale ee lagu nadiifiyo.



Warankiillada guryaha lagu adeegsado oo la baraxay ayaa sagxadaha jeermiska ka dili kara. Ku-qas 1/3 koob warankiillo ah halkii galoon oo biyo ah ama 4 qaando oo tan shaaha ah halkii rubuc galoon biyo ah. Ha ku qasin warankiillada kiimikooyin kale.



Eeg mareegtada Hay'adda Ilaalinta Deegaanka, [epa.gov/coronavirus](https://www.epa.gov/coronavirus) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jeermis-dilayaasha.



La Shaqeynta bukaannada la xannuunsan cudurkka COVID-19



U-diyaari qol iyo musqul gaar ah, haddii la heli karo.



Haddii xubnaha reerka ay meel wadaagaan, daaqadda fur oo marwaaxad u shid si ay hawo u helaan.



Hubso qof kasta oo guriga jooga in uu haysto gacmo-gashiyo iyo weji xir ama weji xir maro ka sameysan.



Weyddii xubin reerka ka tirsan ama xubin qoyska ka tirsan oo caafimaadqaba in uu daryeelo xayawaanno kasta oo rabbaayad ah.

Xiro qalabka difaaca qofka



Weji xir ama neefsiiyaha N95



Dhaaraanka ay xirtaan takhaatiirta



Gacmo-gashiyo



Difaaca indhaha

Haddii qalabka PPE uu dad ku yar yahay:



Mudnaanta-sii dhaaraanka ay xirtaan takhaatiirta ee loogu talagalay daryeelka xiriirka sarreeya leh iyo daryeelka kugu soo gaarayo dareeraha jirka



Mudnaanta-sii difaaca indhaha iyo weji xirka loogu talagalay daryeelka fool-ka-foolka ah



Wac 9-1-1 haddii bukaankaaga ama macmiilkaaga uu dareemo wax ka mid ah astaamahan soo socda:



Wejiga ama bushimaha oo buluug ah



Dhibaatooyin xagga neefsiga ah



Isbeddel ku yimaada miyirqabka



Qandho heerkeedu sarreeyo

Qorsheynta wareejinta



Haddii la yaqaanno, sii macluumaad caafimaad oo ku saabsan cudurrada la isqaadiin karo, dardaaran horumarsan iyo Awaamiirta Takhtarka ee loogu talagalay Daaweyn Noloshu Lagu Joogteynayo (POLST) shaqaalaha kale ee adeegga. Bixiyayaasha adeegga caafimaadka, sidoo kale sii awaamiirta takhtarka.



Haddii aad daryeelayso macaamiil ama bukaanno la xannuunsan cudurka COVID-19, waa in aad xaaladda caabuqa la wadaagto adeeg bixiyaha guddoomaya bukaanka iyo shaqaalaha gaadiidka ku qaadaya ka hor inta aan la wareejin.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah

Booqo doh.wa.gov/coronavirus ama coronavirus.wa.gov

Wac 1-800-525-0127 (riix # si aad u hesho adeegyada turjumaan)

Fariin qoraal ah erayga **Coronavirus** ugu dir **211211**